

# Sidee ayay Minnesota u wanaajin kartaa waxqabadka iyo adeegyada nasinta ee dadka qaba baahiyaha caafimaadka dabeecada iyo naafonimada?



## Maxaan u rabnaa inaan idinka maqalno?

Waxaan rabnaa inaan qiimeyno waxa caqabadaha ay yihiin ee lagu isticmaalayo iyo looga bixinayo adeegyadaan Minnesota. Waxaan u isticmaaleynaa adeegyada la aruuriyo inaan ku soo jeedno sida loo balaariyo iyo loo wanaajiyo adeegyada iyo inaan ku ogeysiino soo jeedin sharciyeed oo dib loogu qaabeynayo adeegyadaan.

Waaxda Adeegyada Aadanaha Minnesota (DHS), Jaamacada Minnesota (U of M), iyo jaalalka waxay rabaan jawaab celinta dadweynaha ee ku saabsan waayo aragnimada dadka qaata adeegyada soo socda:

- [Adeegyada Taageerada Fiican](#)
- [Adeegyada Waxqabadka Nasinta](#)
- [Adeegyada Taqasuska](#)
- [Adeegyada Nasinta](#)

Ka dhiibo fikirkaaga ee sida dib loogu naqshadeeyo adeegyada si ay u daboolaan baahiyaha dadka iyadoo looga qeybqaadanayo mid ka mid ah qaababka xiggo:



**Dhameystir 15 daqiiqo sahanka onleenka ah**

Waxaad ka geli kartaa sahanka qarsoodiga ah halkaan: [z.umn.edu/waiver-survey](https://z.umn.edu/waiver-survey)



**Uga qeybqaado koox kooxeed (illaa 8 qof fadhigiiba)**

Halkaan iska diwaangeli: [z.umn.edu/study-registration](https://z.umn.edu/study-registration)


## Halagu wareysto

Wada sheekeysiga qof ku qofka ah ee fududeeyaha, turjubaanada ayaa loo bixiyaa sida loogu baahdo.

## Fadhiyada dhegeysiga dadweynaha

Goobaha iyo sharaxaadaha halkaan ayaa lagu xirayaa

## Diiwaangelinta



Dhacdooyinkan waa lacag la'aan inaad ka qeybgashid/ka qeybqaadatid, laakiin diiwaangelin hore ayaa looga baahanyahay howlaha qaar. Dhammaan dadka xiiseynaya adeegyadaan waa laga soo dhaweynayaa (isu doodayaasha, adeeg bixiyayaasha, daryeel bixiyayaasha, iwm.). Warbixin dheeraad ah waxaa laga helayaa halkaan: [z.umn.edu/study-website](https://z.umn.edu/study-website).

Halkan iska diwaangeli: [z.umn.edu/study-registration](https://z.umn.edu/study-registration).